

16 ربيع أول 1443هـ
22 أكتوبر 2021م

جمهورية مصر العربية
وزارة الأوقاف

Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) asoo macallin ah iyo barbaariye

Mahad Allaa iska leh , Allaha Caalamka oo Qur'aanka Kariimka ku yiri:

{ فَبِمَا رَحْمَةٍ مِّنَ اللَّهِ لِنْتَ لَهُمْ }،

(Naxariista Eebe Darteed yaad ugu Jilicday)

Waxaan qirayaa inuusan jirin Ilaah kale Alle mooyee oo aan lahayn mid wax la wadaago, waxaana qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena Muxammad addoonkiisa uu yahay iyo rasuulkiisa, Allow nabadgalyo iyo naxariis iyo barako korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa iyo qofkii ku raacay wanaag ilaa maalinta qiyaame, intaas kaddib.

Nabigeena wuxuu ahaa tusaalaha ugu sarreeya ee dadka xagga korraynta tarbiyada iyo wanaagga waxbarashada, wuxuu ahaa nabiga (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) macllin naxariis badan iyo barbaariye xigmad badan oo qaata fudeydka wanaagna wax dadka ku bara illeen isagaa yiri:

(إِنَّ اللَّهَ لَمْ يَبْعَثْ مَعْنَا، وَلَا مَتَعْنَا، وَلَكِنْ بَعَثَنِي مُعَلِّمًا، وَمُيسِرًا)،

(Alle ima soo saarin anoo wax dhibaya ama macangag ah laakin wuxuu isoo saaray anoo macallin ah oo wax fududeeya), waa qofka yiri (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) :

(إِنَّ الرَّفْقَ لَا يَكُونُ فِي شَيْءٍ إِلَّا زَانَهُ، وَلَا يُنْزَعُ مِنْ شَيْءٍ إِلَّا شَانَهُ).

(deganaanta meel ma gasho hadday gashana way qurxisaa, waxna lagama siibo wixii laga siibana wuu xumaadaa).

Qofkii fiirfiiriya siirada nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) wuxuu ogaanaa inuu u ahaa asxaabtiisa macallinka ugu fiican iyo dhamaan dadka, iyo inuu ahaa midka ugu naxariista badan khalqiga ugu dhimrin badan dadka uu waxbarayo oo abaabinayo oona uu hagagyo, waa kanaa Mucaawiya ibnu Alxakam (Alle raalli haka noqdee) oo oranaya:

(بَيْنَمَا أَنَا أَصَلِّي مَعَ النَّبِيِّ (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) إِذْ عَطَسَ رَجُلٌ مِّنَ الْقَوْمِ، فَقُلْتُ: يَرْحَمَكَ اللَّهُ، فَرَمَانِي الْقَوْمُ بِأَبْصَارِهِمْ، فَقُلْتُ: وَاتَّكَلْ أُمَّهُ، مَا شَأْنُكُمْ تَنْظُرُونَ إِلَيَّ؟ فَجَعَلُوا يَضْرِبُونَ بِأَيْدِيهِمْ عَلَيَّ أَفْحَادِهِمْ، فَلَمَّا رَأَيْتُهُمْ يُصَمْتُونِي سَكَتُ، فَلَمَّا صَلَّى رَسُولُ اللَّهِ (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ)، فَبِأَبِي هُوَ وَأُمِّي، مَا رَأَيْتُ مُعَلِّمًا قَبْلَهُ وَلَا بَعْدَهُ أَحْسَنَ تَعْلِيمًا مِنْهُ، وَاللَّهِ مَا قَهَرَنِي، وَلَا ضَرَبَنِي، وَلَا شَتَمَنِي، قَالَ: (إِنَّ هَذِهِ الصَّلَاةَ لَا يَصْلُحُ فِيهَا شَيْءٌ مِّنْ كَلَامِ النَّاسِ، إِنَّمَا هِيَ التَّسْبِيحُ، وَالتَّكْبِيرُ، وَالتَّهْلِيلُ، وَقِرَاءَةُ الْقُرْآنِ).

Waxaa laga wariyay Mucaawiya bin Alxakam wuxuu yiri: “anoo la tukanaya nabiga – naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee – waxaa handhisay nin dadka ka tirsan waxaan dhahay: Ilaahay hakuu naxariisto, dadkii ayaa indhaha igu soo kuuray, waxaan dhahay: ba’ayeey maxaa idinku dhacay oo aad sidan igu soo fiirinaysaan? Waxay bilaabeen inay gacmahooda ku garaacaan bawdadooda, markaan arkay inay i aammusinayaan waan aammusay, markuu tukaday rasuulka Ilaahay – naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee – hooyadey iyo aabbahay halagu furtee, ma arkin macallin ka fiican hortiisa iyo gadaashiisaba xagga waxbaridda, wallaahi ma i dhibin mana i garaacin mana i caayin” wuxuu yiri salaaddan dadka hadalkooda kuma habboona waa tasbiix kaliya iyo takbiir iyo tahliil iyo quraan akhris).

Waxaa laga wariyay Abuu Umaama (naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee) wuxuu yiri wiil dhalinyar ah ayaa nabiga (naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee) u yimid wuxuu yiri: rasuulkii allow ii fasax sinada dadkii ayaa kusoo yaacay iyagoo canaan usoo jeedinaya waxay dhaheen: yac yac wuxuu yiri rasuulka ii soo dhowow wuu usoo dhowaaday wuxuu yiri wuu fariistay wuxuu ku yiri: mala rabtaa hooyadaada? wuxuu yiri: maya wallaahi Ilaahay ha iga dhigee

furashadaada, wuxuu yiri: dadka xataa lama rabaan hooyooyinkooda, wuxuu yiri: gabadhaada mala rabtaa? wuxuu yiri: maya wallaahi Ilaahay ha iga dhigee furashadaada wuxuu yiri dadka xataa lama rabaan gabdhahooda, wuxuu yiri mala rabtaa walaashaada? wuxuu yiri: maya wallaahi Ilaahay ha iga dhigee furashadaada, wuxuu yiri: dadka xataa lama rabaan walaalahooda, wuxuu yiri mala rabtaa eedadaada? wuxuu yiri: maya wallaahi Ilaahay ha iga dhigee furashadaada, wuxuu yiri dadka xataa lama rabaan eedooyinkooda, wuxuu yiri mala rabtaa habaryartaada wuxuu yiri: maya wallaahi Ilaahay ha iga dhigee furashadaada wuxuu yiri: dadka xataa lama rabaan habaryaryaashooda wuxuu yiri gacanta ayuu saaray wuxuu yiri:

(اللَّهُمَّ اغْفِرْ ذَنْبَهُ، وَطَهِّرْ قَلْبَهُ، وَحَصِّنْ فَرْجَهُ)

(Ilaahayow dambigiisa dhaaf qalbigiisana daahiri farjigiisana ilaali)
wiilka markaas kaddib waxba ma eegin.

Mahad oo dhan waxay u sugnaatay Allaha caalamka, naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato kan lagu khatimay anbiyada iyo rususha, sayidkeenna Muxammad (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) , iyo dhammaan ehelkiisa iyo asxaabtiisa.

Qofka fiirfiirinaya nolosha nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) wuxuu arkayaa inuu ahaa mid ku dadaala inuu kala nooc ka dhigo qaababka uu dadka ugu yeeri jiray ama wax u bari jiray, wuxuu adeegsan jiray dhamaan xirfadaha isla xiriir dacwada; si uu u aado caqliga qofka qaadanaya iyo qalbigiisa Mar wuxuu adeegsan jiray (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) luqadda nambarada si uu ugu soo dhoweeyo caqliga sida oraahdiisu tahay:

(ثَلَاثٌ مَنْ كُنَّ فِيهِ وَجَدَ حَلَاوَةَ الْإِيمَانِ: أَنْ يَكُونَ اللَّهُ وَرَسُولُهُ أَحَبَّ إِلَيْهِ مِمَّا سِوَاهُمَا، وَأَنْ يُحِبَّ الْمَرْءَ لَا يُحِبُّهُ إِلَّا لِلَّهِ، وَأَنْ يَكْرَهُ أَنْ يَعُودَ فِي الْكُفْرِ بَعْدَ إِذْ أَنْقَذَهُ اللَّهُ مِنْهُ؛ كَمَا يَكْرَهُ أَنْ يُلْقَى فِي النَّارِ)

(sedex qofka ay ku sugan yihin wuxuu helayaa iimaanka macaankiisa: Ilaahay iyo rasuulkiisa inay ahaadaan kuwa looga jecel badan yahay wixii iyaga ka sokeeya, inuu qofka uusan u jeclaanin Ilaahay dartii waxan ahayn, inuu noco inuu u laabto gaalnimada marka Ilaahay kasoo badbaadiyay kadib siduu u nacayo in lagu rido dabka)

Marna (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) wuxuu bari jiray asoo adeegsanaya tusaalooyin caddeeya; waxaa ka mid ah oraahtiisa:

(إِنَّمَا مَثَلُ الْجَلِيسِ الصَّالِحِ، وَجَلِيسِ السُّوءِ، كَحَامِلِ الْمَسْكِ، وَنَافِخِ الْكَبِيرِ، فَحَامِلُ الْمَسْكِ إِمَّا أَنْ يَحْذِيكَ، وَإِمَّا أَنْ تَبْتَاعَ مِنْهُ، وَإِمَّا أَنْ تَجِدَ مِنْهُ رِيحًا طَيِّبَةً، وَنَافِخُ الْكَبِيرِ إِمَّا أَنْ يَحْرِقَ ثِيَابَكَ، وَإِمَّا أَنْ تَجِدَ رِيحًا خَبِيثَةً).

(Saaxiibka fiican iyo saaxiibka xun tusaalahooda waa sida kan miskiga wada iyo kan buufinka tumaalka afuufaya, kan miskiga inuu wax kuu hadiyeeyo ama aad ka gadato ama aad ka hesho caraf fiican, kan buufinka tumaalka afuufaya inuu dharkaaga gubo ama aad ka hesho ur xun)

Marna wuxuu adeegsan jiray (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) qaab su'aaleed; si uu usoo jiido qofka qaadanaya una buraarajiyo waxaa ka mid ah taas oraahtiisa (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

(أَتَدْرُونَ مَنْ الْمُفْلِسُ؟ قَالُوا: الْمُفْلِسُ مَنْ لَا دِرْهَمَ لَهُ وَلَا مَتَاعَ؛ فَقَالَ (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ): إِنَّ الْمُفْلِسَ مِنْ أُمَّتِي يَأْتِي يَوْمَ الْقِيَامَةِ بِصَلَاةٍ وَصِيَامٍ وَزَكَاةٍ، وَيَأْتِي قَدْ شَتَمَ هَذَا وَقَذَفَ هَذَا، وَأَكَلَ مَالَ هَذَا، وَسَفَكَ دَمَ هَذَا، وَضْرَبَ هَذَا فَيُعْطَى هَذَا مِنْ حَسَنَاتِهِ، وَهَذَا مِنْ حَسَنَاتِهِ، فَإِنْ فُتِنْتَ حَسَنَاتُهُ قَبْلَ أَنْ يُفْضَى مَا عَلَيْهِ أُخِذَ مِنْ خَطَايَاهُمْ فَطُرِحَتْ عَلَيْهِ، ثُمَّ طُرِحَ فِي النَّارِ).

(Ma ogtihiin qofka waxba haysanin, waxay dhaheen qofka waxba haysanin rasuulkii Allow waa qofka aan lahayn lacag iyo alaab,

wuxuu yiri (qofka waxba haysanin ummaddayda waa qofka la imaanayo maalinta qiyaame salaaddiisa iyo soonkiisa iyo sakadiisa, wuxuu imaanayaa asoo midkan soo caayay kanna soo qadfiyay kan hantidiisana soo cunay, kan dhiiggiisana soo daadiyay, kanna soo garaacay, wuu fariisanayaa midkan wuxuu ka goosanayaa xasanaadkiisa midkanna wuxuu ka goosanayaa xasanaadkiisa, markay xasaandkiisu dhamaadaan intaan laga goosanin wixii gafaf uu galay waxaa lasoo qaadayaa gafalkooda isaga ayaa lagu tuurayaa kaddibna naarta ayaa lagu tuurayaa).

Sidoo kale nabiga (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) wuxuu dooran jiray maalmaha iyo waqtiyada ku habboon waxbarshada iyo hagidda si uu firfircooni u siiyo maskaxda dadka qaadanaya, asoona ka reebaya inay ka caajisaan, wuxuu leeyahay sayidkeena Cabdullaani bin Mascuud (Ilaahay raalli haka noqdee)

(كان النبي (صلى الله عليه وسلم) يتخولنا - أي: يتعهدنا - بالموعظة في الأيام، كراهة السامة علينا).

(Nabiga (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) wuxuu na siin jiray wacdiga maalmaha qaar iyadoo la nacayo inaan ka daalno)

Maxaa inooga baahi badan inaan ku dayano akhlaaqda nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) anagoo macallmiin ah iyo anagoo waxbaranayna saan u faafino risaaladiisa una caddeyno hadyigiisa iyo sunnadiisa

Ilaahayow nagu arsaaq cilmi iyo edeb naguna hanuuni inaan qaadano akhlaaqda nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee)